

Dawlada Galbeedka Awstareeliya

CABASHO KA GUDBINTA ADEEGYADA DAWLADA

Hadalka Mabaadiida ah

Waxaad xaq u leedahay:

Inaad cabato markaadan ku qancin adeega ama natiijada ay bixisay wakaalada dawlada, si cabashadaada loogu qaato wax khatar ah oo laguula dhaqmo si leh xushmad iyo tixgelinba.

Waxaa muhiim ah nidaam maamul wanaagsan oo cabashooyin, sababtoo ah waxay ku siineysaa natiijo celin qiimo leh oo kaa caawineysa hagaajinta adeegyada. Dhammaan wakaaladaha dawlada waxaa laga doonayaa inay yeeshaan nidaam jira oo lagu maamulo cabashooyinka.

caddaaladnimo

nidaamka cabashooyinku waa inuu ahaadaa mid caddaalad ah. Tan micnaheedu waa: inay labada dhinacba ee iska cabanaya ay xaq u leeyihiin in la dhageysto oo aragtiyahooda la tixgeliyo. Qofka laga dacwoonayo waa inay ogaadaan dhammaan waxyaabaha lagaga cabanayo oo ay helaan fursad ay ku sheegaan dhammaan macluumaadka khuseeya arintan waana in la tixgeliyaa qofka go'aanka gaarayaana waa inuu ahaadaa mid caddaalad ah oo aan dhinacna u janjeedhin.

caawimaad

caawimaad ayaad heli kartaa haddii aad caawimaad uga baahan tahay sidii aad u xareyn lahayd cabasho. Tan waxaa ku jiri kara caawimaada xagga buuxinta foomka ama qabashada turjubaan aqoon u leh afkaad ku hadalkiisa ugu fiican tahay.

wakhtiyeynta

wakaaladuhu waxay leeyihiin wakhtiyo go'an oo ay wax ka qabtaan cabashada. Markaad sameyso cabasho, waa in lagu sheegaa intuu qaadan karo nidaamkani iyo wuxuu yahay wakhtigu.

Sidii aad u sameyn lahayd cabasho

U tag wakaalada dawlada gobolka ee aadan u qanacsaneyn cabashadaada u gudbi.

Waxaad ku sameyn kartaa cabashadaada qoraal oo aad diri kartaa ado isticmaalaya boosta, fakis ama iimeyl. Waxaad sidoo kale ku sameyn kartaa cabashada taleefanka ama qof ahaantaada tegi kara.

Hubi inaad kala hadho nuqul warqad kasta oo aad dirto. xasuuso in nuqulka warqadaadu la siin doono qofka aad ka cabaneyso.

Qor taariikhda iyo magaca qofka aad la hadasho iyo waxay ogolaadeen sameyntiisa.

Haddii aad u maleyso inaan cabashadaada si wanaagsan wax looga qaban marka ugu horeysa, waxaad weydiisan kartaa inuu dib u eego sarkaalka ka sareeya ama maareeyaha.

Haddii aadan weli ku qanacsaneyn, waad sii wadan kartaa cabashadaada, oo aad aadi kartaa mid ka mid wakaaladaha dib u eega kiisaska.

Markaad cabasho sameyso:

Kula dhaqan dhammaan shaqaalaha xushmad iyo tixgelin;

Ka sii sharaxaad buuxda oo saxa dhacdooyinka la xiriira cabashadaada;

Sii wakaalada macluumaadka ugu badan ee ku saabsan cabashada ee suurto galka ah, iyo sida ugu dhakhsaha badan;

Ilaali ballamada iyo kulamada ku saabsan cabashada, haddii aysan suurto gal ahayn, ogeysii qofka ay khuseyso;

Waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad cabashadaada soo qorto iyo weliba inaad taleefanka ku sheegto ama qof ahaanba aad u tagto. Weydii wakaalada haddii aad u baahan tahay caawimaad si aad tan u sameyso.

Sii wadida cabashada

Haddii aadan ku faraxsaneyn sida cabashadaada ay wakaalada dawladu wax uga qabatay, waxaa jira haayado sii baari kara cabashadaada.

Baaritaanka ay haayadahani ku sameyn karaan cabashadaada way ka duwan tahay dib u eegid kasta amase nidaamka racfaanka ee ka dhaca wasaarada gudaheeda aad ka cabaneyso.

Halkaan waxaa ku qoran qaar ka mid ah haayadaha dib u eegida ee aad u tegi karto haddii aad dooneyso inaad cabashadaada sii wado:

Garsooraha Gobolka
(State Ombudsman)
Taleefan: 9220 7555
Baadiyaha kuwa ka soo wacaya: 1800 117 000
www.ombudsman.wa.gov.au

Golaha Fursada Siman
(Equal Opportunity Commission)
Taleefan:9216 3900
Baadiyaha kuwa ka soo wacaya 1800 198 149
www.equalopportunity.wa.gov.au

Xafiiska Dib u Eegida Caafimaadka
(Office of Health Review)
Taleefan: 9323 0600
Baadiyaha kuwa ka soo wacaya: 1800 813 583
www.healthreview.wa.gov.au

Wixii ah faahfaahinta xiriirka wakaaladaha dawlada gal

www.complaints.wa.gov.au

ama kala xiriir haayadahan wixii caawimaad dheeraad ah:

Xarunta Macluumaad siinta Soo galootiga Xaafadaha Waqooyi
(Northern Suburbs Migrant Resource Centre)
Unit 1, 14 Chesterfield Road, Mirrabooka
Taleefan: 9345 5755

Xarunta Macluumaad siinta Soogalootiga Koonfurta Magaalo weynta
(South Metropolitan Migrant Resource Centre)
243 High Street, Fremantle
Taleefan: 9335 9588

Xarunta Soogalootiga Katooliga
(Catholic Migrant Centre)
25 Victoria Square, Perth
Taleefan: 9221 1727

Xarunta Adeegyada Dhaqamada kala duwan ee Galbeedka Australiya
(Multicultural Services Centre of Western Australia Inc).
20 View Street, North Perth
Taleefan: 9328 2699

macluumaadkan waxaa lagu heli karaa siyaalo kale